Baaritaanka Cilmiyeysan ee Caafimaadka

Maxaa dhacaya inta uu socdo baaritaanka cilmiyeysan ee caafimaadka?

- Aqoonyahan sare ee caafimaadka ayaa ku weydiin doona su'aalo ku saabsan waxa dhacay waqtiga uu dhacay xadgudubka galmada ama kufsiga.
- Waxaa la qaadayaa baaritaan madaxa illaa ciribta si lagu ogaado haddii ay jiraan wax dhaawacya ah ee la diiwaangalin doono.
- Waxaa samballo laga aruurinayaa qeybo kamid ah jirkaaga kuwaaso laga raadinayo UNUGYADA ISIRWAAGGA (DNA) ee qofka ku dulmiyay.
- Caddaymo dheeraaraada ee la isdhi karo waxbay tarayaan ayaa la aruurinayaa haddii aad doraatid in aad boliiska wargalisid.
- Waxaa dhici karta in lagu siiyo daawooyin looga hortagayo caabuqa cudurrada galmada laysku qaadsiiyo iyo uur-qaadista.
- Aqoonyahanka sare ee caafimaadka waxuu kaala hadli doonaa khatarta lagu qaadi karo HIV marka ay jirto xadgudubka galmada ama kufsiga.
- Aqoonyahanka sare ee caafimaadka waxuu ku weydiin doonaa su'aalo inta uu socdo qayb kasta ee baaritaanka caafimaadka lagaaga qaadayo.
- Waaxaa dhici karta in aad u baahatid daryeel caafimaad ee dhaafsiisan baaritaanka cilmiyeysan ee caafimaadka.

Maxa ka imaan doonaa caddaymaha la aruuriyay?

Caddaymaha la aruuriyaya inta hawsha socotay waa la tijaabin doonaa haddii ay jirto warbixin loo dirayo boliiska.

Isbitaalka wax tijaabo ah kuma sameynayo wixii caddeymo ee la aruuriyay.

Marka warbixin loo gudbiyo boliiska, waaxda booliska ee degmadaa ayaa caddaymaha ka qaadaysa isbitaalka waxayna u wareejin doontaa hay'adda ku habboon in ay qaaddo baaritaanka cilimiyeysan ee cayddayamaha.

Siyaabooyin kala duwan ayaa gobolka wax looga qabtaa. Waxa aad aqoonyahanka sare ee caafimaadka kala hadashaa halka ay ku dambayn doonaan caddaymaha lagu soo aruuriyaya marka caafimaadka lagaa qaadayay. U doodahaha deegaanka ee xagdugubka galmada waxaa kale ee uu kaa caawin doonaa sida aad ku heli lahayd illaa inta ay la egtahay muddada caddaymaha la hayn doonoo.

Maxay yihiin xuquuqyadayda?

Marka aad dooratid in baaritaan lagugug sameeyo kaddib marka uu dhacay xadgudubka galmada ama kufsiga waa wax ku taxluqa caafiamadkaaga iyo ammaankaaga. Waxa aad xaq u leedahay in aad oggolaatid ama aad diiddid mid kasta ee kamid ah baaritaanka caafimaadka waqti kasta.

Waxa aad codsan kartaa in u doodaha, haddii uu midi jiro, in uu kula joogo ama ay kula joogto inta baaritaanka cilmiyeysan ee caafimadka lagaa qaadayo.

Kharashka Baaritaanka

Baaritaanka cilmiyeysan ee caafimaadka

Sida uu qorayo sharciga Minnesota, degmada uu ka dhacay falka xadgudubka galmada ama kufsiga ayaa masuul ka ah kharashka lagu aruurinayo caddaymaha inta uu socdo baaritaanka cilmiyeysan ee caafimadka. **Degmada ayaa waajib ku tahay inay bixiso** kharashka haddii ama haddii aanan warbixin loo gudbin boliiska.

Kaddib marka la dhammaystiro baaritaankaaga cilmiyaysan, waxaa dhici in degmadu ay adiga oo raali ka ah caymiskaaga u qaanshegato. Degmadu waa inay oggolaashahaaga hesho kahor inta anay caymiskaaga u qaansheegan. Haddii ay degmadu ama haddiisan degmadu ka faaideysan caymiskaaga **doorashada adiga ayaad iska leh**.

Daryeel kale ee caafimaadka

Adiga ayaa masuul ka ah kharashyada kale ee la xaariira daryeelka caafimadka ee aad ka heleyso isbitaalka, ay ku jiraan daawooyinka iyo daawaynta dhaawacyada qaarkood. Haddii aadan doonayn in caymiiskaaga loogu qaansheegto kharashyada la xariira daawaynta, fadlan la hadal xafiiska qaansheegatada isibtaalka.

Isbitaalka ayaa u qaansheeganaya caymiskaaga kharashyadaan. Isibitaallada oo idil waxay leeyihiin barnaamiyada saddaqada iyo gargaarka dhaqaalaha haddii aad doonaysid in lagaa caawiyo bixinta kharashyadaada.

Waxa xiga marka aad isbitaalka tagto

Haddii aad hesho qaansheegto la xariirta baaritaanka heerka sare, waxaad wacdaa barnaamijkaaga xadgudubka galmada si ay kaaga caawiyaan la xariirka degmada. U doodayaasha barnaamijka xadgudubka galmada ee degmadaada ayaa sidoo kale kaa caawin karaan weydiimaha bixinta kharashyada iyo dareemaha.

Gal **www.rapehelpmn.org** si aad ku heshid baarnaamijka kuugu dhow iyo lagula xariiryo qof kuu hadla.

Tallaabooyhinka Xiga

Go'aan qaadashda warbixinta lagu sameynayo

Dhibbanaha xadgudubka galmada ama kufsiga qasab kuma aha in ay boliiska wax u sheegto/u sheego. U doodaha xadgudubka galmada waxa/wuxuu ay/uu ku siin kartaa/karaa macluumaad dheeraada ee waddada ay dhibbanaha mari lahayd.

Minnesota waxay xuquuq gaara siisaa dhibbanayaasha dembiga ee wax u soo sheega boliiska. Xuquuqdaan waxaa loogu talagalay in ay badiyaan difaaca la siinayo dhibbanaha, dhibaanaha la siiyo macluumaadka, fursad loo siiyo in ay ka qaybqaadato dacwadda socota ee uu wado xeerilaaliyaha iyo waxkasta ee soo bixi kara, iyo in dhibbanaha la siiyo gargaarka dhaqaalaha. Wixii macluumaad dheeraada, la soo xariir barnaamijka xadgudubka galmada ama waxaad gashaa **ojp.dps.mn.gov.**

Haddii aad ammaankaada u baqaysid

Haddii aad nabaddaada u baqaysid ama ka baqaysid qofka ku kadeeday, waxaad dacwad maadani ah ee badbaadada ah ka xaraysan kartaa maxkamadda. Garsooraha waxuu amar ku bixin karaa in dambiilaha uusan wax xariir ah kula soo yeelan iyo in uu kaa fogaado.

Waxaa jira laba nooc ee badbaada madaniga ah: **Amarka Badbaadada (Order for Protection)** iyo **Amarka Xakamaynta (Harassment Restraining Order)**. Nooca amarka ah ee ku habboon waxuu ku xiranyahay nooca cilaaqaadka ee aad la lahayd qofka ku kadeeday iyo xaaladda dulmiga ama handadaadda ee meesha ka dhacday. Waxaad dacwad ku xaraysan kartaa adiga oo aan shilinna kaa bixin.

La soo xariir barnaamijka xadgudubka galmada ee deegaankeenna ama maxkmadda deegaanka si aad ku heshid habka hawsha loo marayo.

Gal **www.rapehelpmn.org** (caawinaadda la siinayo qof lagu kufsaday Minnesota) si aad ku heshid barnaamijka kuugu dhow.

Gargaarka Dhaqaalaha

Dhibbaanayaasha xadgubuka galmada ama kufsiga ee soo wargaliya boliiska waxay ka dalban karaan gargaarka dhaqaalaha **Guddiga Magdhawga Dhibbanayaasha Minnesota (Minnesota Crime Victims Reparation Board)** haddii ay khasaaro dhaqaale ka soo gaartay dembiga.

Guddiga Magdhawga waxay kaa bixin karaan kharashka ku baxa sida adeegyada hanuuninta, kharashka daawaynta, ay ku jiraan daawooyinka la qoray.

Foomanka iyo macluumaadka waxaa laga heli karaa:

Minnesota Crime Victims Reparations Board
651.201.7300 • 1.888.622.8799
ojp.dps.mn.gov

Caawimadda La Helayo

Adeegyada waxaa si lacagla'aan looga helayaa barnaamijka xadgudubka galmada ee degaankaaga, ay ku jirto khadka degdegga ee 24ka saacadood, faragalinta dagaalka, guddiyada taageerada iyo u doodidda.

U doodadaha barnaamijka xadgudubka galmada waxay awooddaa in ay:

- Kaa caawiso/wiyo sidaad si tafatiran ku fahmi lahayd mowduucyada kor ku qoran.
- Kaa caawiso/wiyo sidaad ku fahmi lahayd in jawaabahaada qiireed iyo kuwa jireed ay yihiiin jawaabo caadi ah.
- Dhageysto qushuuca iyo walaacaada.
- Kaa cawiso/wiyo in aad fahamto waxa jira iyo ka fiirsashadaada waxa aad samayn lahayd.
- Kuu sharaxdo/sharraxo nidaamka sharciga loo marayo iyo haddii aad ku talajirtid inaad ka dacwootid dembiga.
- Kugu xirto/xiro dhinacyo ayada oo adiga ku metelaysa haysatana ogolaashahaaga.

Barnaamijyada xadgudubka galmada waa kuwo sharci ahaan iyo sharaf ahaan loogu bahaanyhay si lagu difaaco aaqoonsigaaga. Xuquuqdaada iyo aqoonsigaaga waxaa laguugu sharixi doonaa marka aad adeegyada soo raadsatid.

La soo xariir barnaamijka xadgudubka galmada ee ku qoran wajiga dambe ee buug yarahaan, haddii uusan ku qornaynna, telefoonka ka wac Minnesota Day One Line **866-223-111** ama gal **www.rapehelpmn.org** si aad ku heshid macluumaad dheeraada ee kula xariirinaya adeegyada degmada.

Cidina xaq uma laha in ay ku taabato, ku xoogto, kuu hanjabaaddo amaba kula galmoota adiga oo aan raalli ka hayn. Siday doontaba ha ahaate, ma astaahishid in lagugu xadgudbo galmo ahaan ama kufsiga.

Kaddib marka uu dhaco xadgudubka galmada ama kufsiga, waxaa kula soo guboonaanaya dareem taageero la'aan ah, cidlo, caro, cabsi, murugo, walwal, fadeexo ama ceeb. Xadgudubka galmada waa fal aad u foolxun; qof kastana siyaabo qofka kale ka duwan ayuu u darsaa lana soo gudboonaadaan shuucur kala duwan.

Helitaanka Caawimaadda

Si aad ku hesho caawimaad wac khadadka 24ka saacadood ee degdegga ee musiibada xadgudubka galmada:

www.rapehelpmn.org

Si laguula xariiriyo adeegyada kale ee deegaanka:

Minnesota Day One Line
1.866.223.1111

United Way 211 - macluumaadka iyo diryoda 24ka saacadood
211 ama 800-543-7709

Si lagu helo macluumaadka u qalmidda magdhawga gargaarka dhaqaalaha iyo foomanka:

Crime Victims Reparations Board
651-201-7300 • 1-888-622-8799 • ojp.dps.mn.gov

Si aad ku codsatid in lagula socodsiiyo maxbuuxka ka siidayntiisa xabsiga ama aad ku heshid macluumaad kale ee haynta la xariira:

Minnesota VINE
Victim Information and Notification Everyday
877-MN4-VINE • 877-664-8463 • www.vinelink.com

Barnaamijka Asturnaana Cinwaanka ee Guriga Ammaka ah (Safe at Home Address Confidentiality Program)

www.sos.state.mn.us • 866-723-3035

Isbahaysiga Minnesota ee Kahortagga Xadgudubka Galmada (Coalition Against Sexual Assault)

Ilaha warqadaha runta iyo daraasadaha: www.mncasa.org

Haddii aad tahay dhibbanaha dembiga ama marqaati iyo aad rumeysantahay in xuquuqdaada lagu xadgudbay (la jabiyey):

Crime Victim Justice Unit
651.-201-7310 • 1-800-247-0390 ext. 3

Haddii aad taageero ugu baahatid si aad uga soo kabsatid xadgudubka galmada ama kufsiga, barnaamijka xadgudubka galmada ee degaankaaga yaa diyaar ku ah inuu ku caawiyo.

Waxaa soo diyaariyay Waaxda Badbaadada Guud ee Minnesota Xafiisaka Barnaamijyada Garsooka (Minnesota Department of Public Safety Office of Justice Programs)

Dhibbanayaasha Xadgudbka Galmada (Kufsiga)

Xuquuqdaada iyo ilahaaga

Macluumaad muhiima ee ku socda dhibbanayaasha doonaya daryeelka caafimaadka ama baaritaan cilimiyasan ee caafimaadka kaddib marka uu dhaco xadgudubka galmada ama kufsiga.

Caafimaadkaaga iyo ladnaanshahaaga guud waa waxa ugu muhiimsan.